# Ogaysiiska Xeerarka Sirta

**Waxaan u taagan nahy ilaalinta Sirtaada**
qarinta xogtaada caafimaadka ayaa had iyo jeer waxay ahayd mudnaanta Corewell Health. Ogeysiiskaan wuxuu siinayaa bukaannada iyo qoysaska Corewell Health xog ku saabsan xuquuqdooda sirta iyo dedaalka joogtada ah ee Corewell Health ku ilaalinayso xuquuqahooda. Waxaad xaq u leedahay inaad gaarto dookhyo ku aadan qaabka xogtaada caafimaadka loo uruursho loona adeegsado.

**Su'aalaha ama Walaacyada**
Corewell Health, Chief Privacy Officer MC168, 100 Michigan Street NE, Grand Rapids, MI 49503
• Wac: **616.486.4113**
• Iimeelka: **privacy@corewellhealth.org**

**Ogaysiiska Wadajirka ah ee Xeerarka Sirta**
Ogeysiiskan waxa uu qeexayaa sida loo isticmaali karo loona shaacin doono macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan iyo sida aad adigu u heli karto macluumaadkan. **Fadlan si taxadar leh u akhri ogeysiiskaan**. Ogeysiiskaan ayaa Dhaqan galaaya Agoosto 17, 2023.

Haddii aad su'aalo ka qabto ogeysiiskaan, la xiriir Madax Sirta ee Corewell Health oo aad ka helayso **privacy@corewellhealth.org** ama adiga oo adeegsanaaya xogta xiriirka ee kor ku qoran.

**Yaa Ku Dhaqmaaya Ogeysiiskaan**
Ogeysiiskaan wuxu quseeya "Corewell Health" ama "xarumaha Corewell Health" ayna ku jiraan isbitaallada, xarumaha kalkaalisooyinka tababaran, xarumaha daryeelka degdega ah, shaqaalaheena caafimaadka, wakaaladaha daryeelka caafimaadka guriga, xarumaha daryeelka dadka sii dhimanaaya, rugaha caafimaadka, xafiisyada, iyo xarumaha ay maamusho Corewell Health. Dhammaan xarumaha Corewell Health iyo xafiisyada ayaa ku dhaqmaaya ogeysiiskaan, haddii magacooda la sheegay ama aan la sheegin labadaba.  Isbadelka lagu sameeyo Ogaysiiskaan Maaraynta Xogta Sirta ah ayaa laga heli karaa xafiiska ama xarunta aad ka helayso daryeelka, adoo wacaaya **616.486.4133** ama iimeel u diraaya **privacy@corewellhealth.org**. Ogeysiiskaan ayaa sidoo kale quseeya ururada ka qaybgalaaya Qorshaha Daryeelka caafimaadka ee Abaabulan ee (OHCA) ee Corewell Health. Ururadaan ayaa dhexdooda wadaagaaya xogtaada caafimaadka ee Dhowrsan (PHI) si ay ugu adeegsadaan daawaynta, lacag bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka.

Corewell Health ayaa leh xaquuqda badelida ka qaybgalka barnaamijkeeda OHCA oo uu ka qaybgalo shaqsi ama urur gaar ah.  Haddii aad su'aalo ka qabto xaalada ka qaybgalka bixiyaha xanaanada caafimaadka ee OHCA, wac **616.486.4133** ama iimeel u dir **privacy@corewellhealth.org**.

**Balan-qaadkeena Ku Saabsan Xogtaada Caafimaadka**
Waxaan fahmaynaa in xogtaadu ay tahay mid shaqsi ah, waxaana u taagan nahay difaaceeda. Xogta caafimaadka ee aan adeegsano, abuurno, hayno, oo aan shaaca ka qaadno waxa kugu saabsan waxaa laga yaabaa inay la xiriirto daryeelka caafimaadka jirka iyo maskaxda ee aad naga hesho. Waxaan abuurnaa diiwaanka daryeelka iyo adeegyada aad ka hesho Corewell Health. Diiwaankaan ayaa noo sahlaaya inaan ku siino daryeelka tayada leh aana ku dhaqanno shuruudaha qaar ee sharciga ah. Ogeysiiska ayaa quseeya dhammaan diiwaannada la xiriira daryeelkaaga ee ay hayso Corewell Health, haddii ay yihiin elektaroonig ama waraaq. Haddii dhakhtarka ku siinaaya daryeelka uusan xubin ka ahayn kooxda Corewell Health, waxaa laga yaabaa inuu lahaan karo xeerar ama ogeysiisyo kale oo quseeya isticmaalka iyo shaacinta xogtaada caafimaadka. Ogeysiiskaan ayaa xog kaa siinaaya qaababka xogtaada caafimaadka loo adeegsado ama loo shaaciyo. Sidoo kale wuxuu qeexayaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga ku aadan adeegsiga iyo shaacinta xogta caafimaadka.

Sharciga ayaa naga doonaya inaan:
• Ilaalino sirta iyo amaanka xogtaada PHI.
• Inaan raacno xeerarka xogta shakhsiga ah ee qoran ogeysiiskan sharciga ah oo aan koobbiga(nuqulka) kaa siineyno.
• Inaan u sheegno shaqsiyaadka saamayntu soo gaarayso kadib marka la jabsado xogta caafimaadka ee dhawrsan ee aan amaankeeda la sugin.

**Sida aan U Adeegsan karto Aana U Shaacin Karno Xogtaada Caafimaadka**
Xaalado badan, waxaan adeegsan karnaa aana shaacin karnaa xogtaada caafimaadka ayada oo aan la helin ogolaanshahaaga qoran. Si kastaba ha ahaatee, isticmaalka iyo shaacinta aan hoos lagu sharaxin waxa kaliya oo lagu samayn doonaa ogolaanshahaaga. Mararka qaar, ogolaanshahaaga qoran ayaa loo baahan yahay si loo adeegsado ama loo shaaciyo xogtaada caafimaad. Tusaale, marna ma iibin doono xogtaada ama uma isticmaali doono xogtaada ujeedooyinka suuqgaynta adiga oo aan noo fasixin. Qaybaha soo socda ayaa qeexaaya qaababka kaladuwan ee aan u adeegsano una shaacino xogta caafimaadka.

**Daawaynta**: Waxaan xogtaada caafimaadka u isticmaali karnaa aana la wadaagi karnaa xirfadleyaasha kale ee caafimaadka ee ku daaweynaya.
Tusaale ahaan, dhakhtar kaa daweynaya dhaawac ayaa dhakhtar kale ka soo codsanaya xaaladdaada caafimaadka guud.
Waxaa laga yaaba inan u shaacino xogtaada caafimaadka si loo sii wado daryeelkaaga. Waaxaha kaladuwan ee Corewell Health ayaa shaacin kara xogtaada caafimaadka si la iskugu dubarido waxyaabaha kaladuwan ee aad u baahan tahay, sida daawooyinka dhakhtarku kuu qoro, shaqada shaybaarka, raajooyinka, ama baxnaaninta, ama si la iskugu dubarido adeeg ku xirista.
Waxaan la wadaagi karnaa xogta caafimaadka ee kugu saabsan dad ka baxsan Corewell Health oo qayb ka ah daryeelkaaga caafimaadka kadib marka lagugu daweeyo Corewell Health, sida xubnaha qoyska ama wakaaladaha caafimaadka guriga. Waxaan siin karnaa xogtaada caafimaadka dhakhtar kale oo laguu gudbiyay ama loo wareejiyay adeegyadaada daryeelka caafimaadka.
Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka(dhakhaatirta) ee kugu daweeya banaanka Corewell Health ayaa u baahan inay arkaan inta badan xogta buuxda ee suuragalka ah si ay u gaaraan go'aanno la xiriira daryeelkaaga. Bixiyaashani(Dhakhaatiirtaan) ayaa geli kara diiwaanadaada elektarooniga ah iyo kuwa waraaqda ah ee ay hayso Corewell Health si ay ugu adeegsadaan ujeedadaan.
Sidoo kale, marka bixiyaashaan(dhakhaatiirtaan) ay kuu

gudbiyaan Corewell Health si laguu daweeyo, waxay awoodaan inay arkaan diiwaanadaada iyo xogtaada caafimaadka si ay u raacaan hormarka daawayntaada. Corewell Health waxay leedahay habraacyo iyo tignooloojiyad u degsan si loo difaaco sirta iyo amaanka diiwaanadaada marka xaaladahaan jiraan.

**Lacag Bixinta**: Waxaan u adeegsan karnaa una shaacin karnaa xogtaada caafimaadka iyo macluumaadkaga aan caafimaadka ahyn si aan uga dalbano ugana helno caymisyada caafimaadka ama wakaaladaha kale qarashka daawada iyo adeegyada aad ka heshay Corewell Health. Tusaale, waxaan xogtaada siin karnaa caymiskaaga si uu u dhiibo qarashka daryeelkaaga caafimaadka ama adeegyada.  Waxaan u sheegi doonaa caymiskaaga daawada aad helayso si aan u helno ogolaanshaha hore ama aan u go'aamino in caymiskaagu uu dhiibaayo daawada. Bixiyeyaasha qaarkood ee bixiya daryeelka biilka Corewell Health si gooni ah waxaana laga yaabaa inaan siino macluumaadka la xiriira lacag-bixinta si ay isugu dubbaridaan biilka iyo habka lacag-bixinta. Sidoo kale waxaan kuu soo diri karnaa qoraal ama taleefan si aan kaagala hadalno koontadaada ama aan u xaqiijino ama u uruurino xog ku saabsan caymiskaaga caafimaadka. Haddii aad si buuxda u dhiibtay qarashka ama adeegga daryeelka caafimaadka, aadna noo sheegto in aadan dooneyn in caymiskaaga caafimaadku uu helo xog ku saabsan shaygaas ama adeegaas, ma siin doono xogtaas shirkadaada caymiska, ilaa nalooga baahdo mooyaane sharci ahaan in sidaas la sameeyo.

**Shaqooyinka Daryeelka Caafimaadka**: Waxaan adeegsan karnaa aana shaacin karnaa xogtaada caafimaadka si aan u usocodsiino ganacsigeena—sida xisaabinta, ka shaqeynta dacwadaha, ama qiimeynta shaqaalaheena. Isticmaaladaan iyo shaacinadaan ayaa muhiim u ah maaraynta hawlaha ganacsiga ee Corewell Health iyo xaqiijinta in dhammaan bukaanadeena ay helaan daryeel tayo leh. Tusaale, waxaan siin karnaa xogtaada Priority Health, qorshe caafimaad oo ay leedahay Corewell Health, kaasoo qayb ka ah Qorshaheena Daryeelka caafimaadka ee Abaabulan (OHCA). La wadaagista xogta Priority Health ayaa naga caawinaysa inaan gaarno yoolalka nidaamkeena isku dhafan ee caafimaadka, sida kor u qaadista tayada, maareynta caafimaadka dadwaynaha, iyo kor u qaadista caafimaadka iyo faya dhawrka guud ee bulshooyinka ay u adeegaan Corewell Health iyo Priority Health. Waxaan sidoo kale adeegsan karnaa xogta caafimaadka iyo xogta ka baxsan caafimaadka si aan kuula soo xiriirno aana kuu waydiino fikirka aad ka qabto tayada adeegyada aad ka hesho Corewell Health iyo sida aan u hormarin karno adeegyadeena. Waxaan sidoo kale isku dhafi karnaa xogta caafimaadka ee ku saabsan bukaanno badan si aan u go'aamino noocyada adeegyada dheeriga ah ee Corewell Health ay tahay inay bixiso, noocyada adeegyada aan loo baahnayn, iyo in daawooyinka qaar ee cusub ay waxtar leeyihiin. Waxaan siin karnaa xogta dhakhaatiirta, kalkaalisooyinka, farsamo yaqaannada, xirfadleyaasha caafimaad ee ardayda ah iyo shaqaalaha isbitaalka si loogu adeegsado hawlaha waxbarashada. Waxaan isku dhafi karnaa xogta caafimaadka ee aan hayno iyo xogta caafimaadka ee ay hayaan ururada kale si aan si aan u barbar dhigno waxqabadkeena aana u go'aamino sida aan u hormarin karno daryeelka iyo adeegyada aan bixino.

**Isticmaalida iyo Shaacinta dhacdooyinka**: Waxaan adeegsan karnaa ama baahin karnaa xogtaada caafimaadka marka ay qusayso isticmaal ama baahin kale oo uu ogolaaday ama uu amraayo sharcigu. Tusaale, wada sheekaysiyada u dhexeeya dhakhaatiirta, kalkaalisooyinka iyo shaqaalaha kale ee Corewell Health ee quseeya xaaladaada caafimaadka ayaa, mararka qaar, la maqli karaa. Fadlan waxaan kuu xaqiijinaynaa inaan leenahay difaacyada saxda ah si aan uga hortagno xaaladaha noocaas ah sida ugu badan ee suuragalka ah.

**Xasuusinada Balanta**: Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno aana shaacino xog caafimaad si aan kuu xasuusino balan soo socota oo aad ku leedahay xarunta Corewell Health facility ama baahida aad u qabto dib u buuxinta daawada laguu qoray.

**Shaqooyinka Lacag Uruurinta**: Marka lacag la uruurinaayo, waxaan adeegsan karnaa xogta caafimaadka ka baxsan qaarkeed, ayna ku jirto, laakiin kuma koobna, magacaaga, ciwaanka, lambarada taleefanka, taariikaha iyo goobaha adeegga, da'da, iyo jinsiga, si aan kuula soo xiriirno si aan u uruurino qaaraanka hayadaha xiriirka la leh Corewell Health oo lagu qaadaayo hayad ay leedahay ama ay maamusho Corewell Health. Lacagta la uruurshay ayaa loo adeegsan doonaa balaarinta iyo kor u qaadista adeegyada iyo barnaamijyada aan siino bulshada. Waxaad xaq u leedahay inaad "diido" isticmaallada iyo shaacinnada xogtaada ee ujeedooyinka qaaraan uruurinta.

**Diiwaanka Isbitaalka**: Waxaan ku dari karnaa xog kooban oo kugu saabsan buuga diiwaanka ee isbitaalka inta aad bukaanka ka tahay isbitaalka Corewell Health. Xogtaan waxaa ku jiri kara magacaaga, goobta isbitaalka, xaaladaada guud (tusaale, mid heer dhexe ah, mid xasiloon, iwm.), iyo diinta aad haysato. Xogtaan, marka laga reebo diinta aad haysato, ayaa sidoo kale la siin karaa dadka codsada magacaaga. Waxaa intaas dheer, isbitaalka ayaa sidoo kale haysan kara diiwaanka gaarka ah ee ay ku qoran tahay diinta aad haysato wuxuuna siin karaa diiwaankas xubnaha diinta(wadaadada). Talaabadaan ayaa loo sameeyaa si qoyskaaga, saaxiibadaa, iyo wadaadadu kuugu soo booqdaan isbitaalka una ogaadaan xaaladaada guud. Waxaad xaq u leedahy inaad naga codsato inaan xadidno (yareyno ama ka saarno) xogtaada la gelinaayo diiwaanka isbitaalka. Si aad u codsato xadidaado, waa inaad noo sheegtaa marka lagu diiwaan gelinaayo.

**Shaqsiyaadka Doorka Ku leh Daryeelkaaga ama Bixinta Qarashka Daryeelkaaga**: Waxaan siin karnaa xogtaada caafimaadka saaxiib ama xubin kamid ah qoyska kaasoo qayb ka ah daryeelkaaga marba haddii aan lagu beegsan, ama haddii aan isleenahay in shaacintu ay tahay maslaxadaada koobaad. Waxaan sidoo kale siin karnaa xogtaada qof door ku leh bixinta qarashka ama naga caawinaaya bixinta daryeelkaaga. Waxaan u sheegi karnaa qoyskaaga iyo saaxiibadaa xaaladaada guud. Waxaa intaas dheer, waxaan xogta caafimaadka ee kugu saabsan siin karnaa haayad kasta oo gacan ka gaysanaysa dedaalka gurmadka masiibada, si qoyskaaga loogu sheego xaaladaada, jawiga, iyo goobta.

**Cilmi baarista**: Duruufaha qaarkood, waxaan adeegsan karnaa aana shaacin karnaa xogta caafimaadka ee kugu saabsan si aan ugu adeegsano ujeedooyinka cilmi baarista. Tusaale, mashruuc cilmi baaris waxaa ku jiri kara

qiimaynta caafimaadka iyo soo kabashada bukaannada helay hal daawo marka lala bardhigo kuwa kale oo isku xaalad ay kusuganyihin oo qaatay daawo kale. Dhamaan mashruucyada cilmi baarista ayaa waafaqsan hanaanka ogolaanshaha gaarka ah. Hanaankaan ayaa qiimeynaaya mashruuca cilmi baarista ee lagu taliyay iyo isticmaalka xogta caafimaadka. Hanaankaan ayaa sidoo kale xaqiijinaaya in baahiyah cilmi baarista loo dheelitiro baahiyaha bukaanaka sirta ee xogtooda caafimaadka. Kahor inta aanaan isticmaalin ama shaacin xogta caafimaadka ee cilmi baarista, mashruuca ayaa dib u eegis loogu samayn karaa hanaankaan ogolaanshaha cilmi baarista. Hase yeeshee, waxaan siin karnaa xogta caafimaadka ee kugu saabsan dadka diyaarinaaya fulinta mashruuca cilmi baarista. Tusaale ahaan, waxaan shaacin karnaa xog ku saabsan cilmi baareyaasha si looga caawiyo raadinta bukaannada qaba baahiyaha gaarka ah ee caafimaadka, ilaa inta xogta caafimaadka ee ay akhriyaan aysan ka bixin Corewell Health. Waxaan u baahan karnaa inaan codsano ogolaanshahaaga gaarka ah haddii cilmi baare uu heli karo magacaaga, ciwaankaaga, ama xogta kale ee gaarka ah, ama uu ka qaybgeli doono daryeelka la xiriira cilmi baarista ee Corewell Health.

**Sida uu Qabo Sharcigu**: Waxaan cid kale siin doonaa xogta caafimaadka ee kugu saabsan marka uu sidaas naga doonaayo sharciga federaalka, gobalka, ama sharciga maxaliga ah, ama xeerka. Tusaale, waxaa nala ka doonayaa inaan soo sheegno dhaawacyada ama xanuunnada qaar sababo caafimaadka dadwaynaha awgood.

**Si looga Hortago Khatar Xun oo Caafimaad ama Badqab**: Waxaan u adeegsan karnaa aana u baahin karnaa xogtaada caafimaadka marka loogu baahdo si looga hortago khatar daran oo ku dhacaysa caafimaadkaaga iyo badqabka ama caafimaadka ama badqabka ee qusaysa dadwaynaha ama qof kale. Waxaan keliya siin doonaa xogtaada qof awooda inuu gacan ka gaysto kahortaga khatarta.

**Xiriirada la Xiriira Barnaamijyada iyo Hawlaha Corewell Health**: Waxaan u adeegsan doonaa xogtaada caafimaadka si aan kuugu wargelino arin qusaysa caafimaadka ama adeegga Corewell Health. Waxaa intaas dheer, waxaa laga yaabaa inaan u adeegsano ama u baahino xogtaada caafimaadka si aan kuugu sheegno badeecooyinka ama adeegyada la xiriira daawayntaada, maaraynta kiiska ama isku dubaridka daryeelka, ama sheegista daawooyinka kale, baxnaaninada, dhakhaatiirta, ama xarumaha daryeelka. Waxaan mararka qaar kuu sheegi karnaa badeecooyinka ama adeegyada shirkad kale laakiin waxaan u adeegsan karnaa ama u baahin karnaa xogtaada caafimaadka ee xiriirada noocaas ah keliya haddii si toos ah la isku dhaafsanaayo.

**Isdhaafsiga Xogta Caafimaadka**: Corewell Health waxay diiwaan gelisa oo soo dirta xogta caafimaadka, ayna ku jirto xogta daawada laguu qoro, qaab elektaroonig ah: Xogta caafimaadka ayaa si elektaroonig ah loogu adeegsadaa ujeedooyinka lagu cadeeyay ogeysiiskaan waxaana lagu difaacaa isdhaafsiyada xogta caafimaadka ee maxaliga ah, kuwa gobalka, iyo kuwa qaranka. Corewell Health ayaa ka qaybgasha isdhaafsiga xogta caafimaadka, ayna ku jirto MiHIN (Michigan Health Information Network (Shabakada Xogta Caafimaadka ee Michigan)), waxaana laga yaabaa inay ka qaybqaadato isdhaafsiyada xogta ee kale ee mustaqbalka. MiHIN ayaa leh xeerar quseeya sida xogta caafimaadka loogu heli karo isdhaafsiga xogta waxayna yareysaa isticmaalka iyo shaacinta xogta noocaas ah. Waxaad imeel u diri kartaa **privacy@corewellhealth.org** si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan MiHIN iyo xuuqdaada la xiriirta ku dirista xogtaada nidaamkaan iyo isdhaafsiyada kale ee xogta caafimaadka.

**Epic's Care Everywhere(App)**: Diiwaankaaga caafimaadka ayaa si elektaroonig ah loo keydshaa Epic, barnaamij software kombuyuutar ah. Si kor loogu qaado daryeelka aad hesho, Corewell Health ayaa diiwaanadaada caafimaadka qaab elektaroonig ah ula wadaagta daryeel bixiyaasha kale ayadoo adeegsanaysa Epic's Care Everywhere. Waxaan tan usamayna si aan u ogolaanaa dhakhaatiirta kale ee daryeelka caafimaadka ee adeegsada Epic oo ku dawaynaaya inay isla markaba arkaan xogtaada caafimaadka. Marka aad ka diiwaan gashan tahay isbitaal kale oo adeegsada Epic, dhakhtarka ku daawaynaaya ee isbitaalkaas ayaa ka codsan kara isbitaalkeena inuu xogta caafimaadka qaab elektaroonig ah ugu soo diro. Tusaale, marka ay jirto xaalad degdeg ah, dhakhtar ayaa codsan kara in diiwaankaaga caafimaadka ee ka yimaada Corewell Health lagu siiyo qaab elektaroonig ah kadibna, haddii la "ogolaado." eegaaya natiijooyinka baaritaankaaga. U wadaagista xogtaada caafimaadka qaabkaan ayaa u sahlaysa dhakhtarka inuu gaaro go'aannada daawaynta oo faahfaahsan. Waxaa jira difaaco diyaarsan oo lagu xaqiijinaayo in aad hadda daryeel ka helayso isbitaalka ama dhakhtarka caafimaadka ee codsanaaya. Dhakhaatiirtu waa inay haystaan xog ku filan oo kugu saabsan si ay u xaqiijiyaan inay ku siinayaan daryeel adiga waana inaad uga diiwaan gashan tahay bukan ahaan diiwaankooda elektarooniga ah ee caafimaadka. Xogtaada caafimaadka waxaa ku jiri kara cudurka lagaa helay ee xasaasiga ah sida HIV/AIDS, cudurada la iskugu gudbiyo galmada, xogta hide sidaha, caafimaadka dhimirka, isticmaalka maandooriyaha, baaritaanka hide sidaha, iwm. Ogeysiisyada caafimaadka dhimirka kuma jiraan diiwaankaaga caafimaadka ama barnaamijkeena isdhaafsiga xogta. Haddii aad dooneyso inaad "iskaga baxdo" Epic's Care Everywhere, fadlan la xiriir Xafiiska Sirta oo aad ka wacayso lambarka taleefanka ama ciwaanka iimeelka ee ku qoran godka koobaad ee ogeysiiskaan.

## Sida aan U Adeegsan karno ama U Shaacin Karno Xogtaada Caafimaadka xaalado gaar ah.

Marar badan, waxaan adeegsan karnaa aana shaacin karnaa xogtaada caafimaadka ayada oo aan la helin ogolaanshahaaga qoran. Waxyaabaha soo socda ayaa qeexaaya sida aan u adeegsan karno ama u shaacin karno xogtaada caafimaadka marka xaalad gaar ah jirto.

**Ku Deeqista Xubinta iyo Jiirka**: Haddii aad tahy mid deeqaayo xubin jirka ah, waxaan baahin karnaa xogta caafimaadka, haddii loo baahdo, oo aan siinayno ururada ka shaqeeya raadinta xubnaha iyo talaalka xubinta, isha, iyo jiirka, ama kaydka deeqda xubnaha jirka.

**Milatariga iyo Ciidanka Hawlgabka ah**: Haddii aad xubin ka tahay ciidamada hubaysan, waxaan baahin karnaa xogta caafimaadka ee kugu saabsan sida ay naga doonayaan maamulka hogaanka milatariga. Waxaan sidoo kale laga yaaba inaan siino xogta caafimaad ee ku saabsan shaqaalaha ciidanka wadamada shisheeya maamulka milatariga shisheeye ee ay qusayso. Haddii aad xubin ka tahay milatariga, xaaladaha qaar, waxaan siin karnaa xogta kugu saabsan wakaalada milatariga ama adeegyada bulshada ee la ogol yahay sida

Laanqayrta Cas si ay ugu sheegto qoyskaaga xaalada aad ku sugan tahay.

**Magdhawga Shaqaalaha**: Waxaan sidoo kale siin karnaa xogtaada caafimaadka barnaamijka magdhawga shaqaalaha ama barnaamijyada lamidka ah. Barnaamijyadaan ayaa bixiya gunnooyinka dhaawacyada iyo cudurada la xiriira shaqada.

**Khataraha Caafimaadka Dadwaynaha**: Waxaan baahin karnaa xogtaada caafimaadka sababo la xiriira hawlaha caafimaadka dadwaynaha, ayna ku jirto si:

- Looga hortago ama loo maareeyo cudur, dhaawac, ama naafanimada.
- Aan soo sheegno dhalashada iyo geerida aana ka qayb qaadano diiwaanka cudurka.
- U soo sheegno xadgudubka ama dayaca ilmaha.
- Loo soo sheego xasaasiyadaha ka dhasha daawooyinka iyo dhibaatooyinka quseeya madeecooyinka.
- Loogu wargeliyo dadka soo celinta badeecooyinka laga yaabo inay isticmaalayaan.
- Ugu sheegno qof u banbaxay cudur ama khatar ugu jiri kara qaadista ama faafinta cudur ama xanuun.
- Loo sheego maamulka dawlada ee ay qusayso haddii aan aaminsan nahay in bukaan uu dhibane u yahay xadgudub, dayac, ama rabshada qoyska. Waxaan xogta shaacinaynaa keliya haddii aad ogolaato, ama marka uu qasbaayo ama ogolaado sharcigu.

**Hawlaha kormeerka Caafimaadka**: Waxaan siin karnaa xogtaada caafimaadka wakaalada kormeerka caafimaadka si ay ugu adeegsato hawlaha sharcigu u ogol yahay. Hawlahaan kormeerka waxaa ku jira, tusaale, isla xisaabtanka, baaritaannada, kormeerada, iyo ruqsadaynta. Hawlahaan ayaa muhiim u ah in dawladu la socoto nidaamka daryeelka caafimaadka, barnaamijyada dawlada iyo ku dhaqanka sharciyada xuquuqda madaniga ah.

**Dacwadaha iyo Khilaafaadka**: Haddii aad qayb ka tahay dacwad ama khilaaf, waxaa laga yaabaa inaan xogtaada caafimaadka bixino si aan uga jawaabno amarka maamulka ee maxkamada. Waxaan sidoo kale shaacinaa xogtaada caafimaadka si aan uga jawaabno amar maxkamadeed, codsiga xog helida ama hawsha kale ee sharciga ah ee uu sameeyo qof door ku leh khilaafka, laakiin keliya waa haddii aad aqbasho shaacinta noocaas ah. Hase yeeshee, ogolaanshahaaga ayaan loo baahan doonin haddii codsiga shaacinta uu saxiixay xaakim ama ay amartay maxkamada sharciga.

**Sharci Fulinta**: Waxaan siin karnaa xogta caafimaadka saraakiisha booliiska marka ay jiraan xaaladaha soo socda: Si aan uga jawaabno amarka maxkamada, baaritaanka, waarantiga, dacwadaha ama hawl lamid ah,

- Si loo aqoonsado ama loo helo qof tuhmane ah, eedaysane ah, markhaatiga farsamo ama qof maqan,
- Haddii xogtu ku saabsan tahay dhibanaha danbi ama haddii, marka ay jiraan xaalado gaar ah, aanaan awoodin inaan helno aqbalaada qofka ee shaacinta,
- Xog ku saabsan geeri aan isleenahay waxaa keenay fal danbiyeed,
- Xog ku saabsan fal danbiyeed ka dhacay xarunta Corewell Health, ama
- Xaaladaha degdega ah si loo soo sheego danbi, goobta danbiga ama dhibaneyaasha, ama aqoonsiga (qeexitaanka ama goobta) qofka danbiga galay.

**Qiimeeyaasha, Baareyaasha Caafimaadka iyo Agaasimeyaasha Tacsida**: Waxaan xogta caafimaadka siin karnaa qiimeeya(baare) ama baare caafimaad. Arintaan ayaa muhiim noqon karta, tusaale, si loo aqoonsado qof dhintay ama loo go'aansho sababta keentay geerida. Waxaan sidoo kale siin karnaa xogta caafimaadka ee ku saabsan bukaannada agaasimeyaasha tacsida, marka loo baahdo, si ay u fuliyaan waajibaadkooda.

**Hawlaha Amniga iyo Sirdoonka Qaranka**: Waxaan siin karnaa xogtaada caafimaadka saraakiisha federaalka ee la aqoonsan yahay ee sirdoonka, hangashta iyo hawlaha kale ee amniga qaranka oo sharcigu fasaxaayo.

**Adeegyada Ilaallada ee Madaxwaynaha iyo Dadka Kale**: Waxaan xogtaada caafimaadka siin karnaa saraakiisha federaalka ee aqooda u leh si ay u ilaaliyaan amaanka madaxwaynaha, dadka dawlada u shaqeeya, ama madaxwayneyaasha kale ee aduunka, ama ay u sameeyaan baaritaanno gaar ah.

**Maxaabiista**: Haddii aad tahay maxbuus ku jira xabsi ama u xiran laanta sharci fulinta rasmiga ah, waxaan siin karnaa xogtaada caafimaadka saraakiisha xarunta dad dhigista ama xabsiga. Shaacintaan waa inay muhiim u tahay in xaruntu ay ku siiso daryeel caafimaad, ku difaacdo caafimaadkaaga iyo badqabkaaga ama caafimaadka iyo Badqabka dadka kale, ama badqabka iyo amaanka xabsiga.

**Dhinacyada Sadexaad**: Waxaan siin karnaa xogtaada caafimaadka dhinacyada sadexaad qaarkood oo aan qandaraas ku siino inay qabtaan adeegyada ayagoo wakiil ka ah Corewell Health. Haddii ay sidaas dhacdo, waxaan heli doonaa xaqiijinada qoran ee dhinaca sadexaad oo ah in xogtaada la ilaalin doono.

**Xogta Sirta ah ee Xasaasiga ah**: Qaar kamid ah xogta caafimaadka ayaa hesha difaaca sirta oo qaas ah, sida xogta caafimaadka dhimirka, adeegyada caafimaadka dhimirka iyo naafada kobaca, daawada khamriga iyo maandooriyaha iyo adeegyada kahortaga, iyo cudurada qaar. Waxaan adeegsan doonaa ama baahin doonaa xogtaada sirta sare ee caafimaadka keliya inta sharcigu ogol yahay ama naga doonaayo, ama aan helno ogolaanshahaaga qoran.

## Xuquuqahaaga Quseeya Xogtaada Caafimaadka

**Xaqa aad U leedahay Eegista iyo Nuqulka**: Waxaad soo codsan kartaa in aad aragto ama aad nuqul ka hesho feylkaaga caafimaadka oo ah waraaq ama feyl shaashadeed iyo macluumaadkaaga kale ee caafimaadka ee aan kaa hayno. Xogta aad helayso waxaa ku jira diiwaannada caafimaadka iyo qarashka laakiin kuma jiraan xogta caafimaadka dhimirka. Waydii Maamulka Xogta Caafimaadka (HIM) sida loo sameeyo arintaan. Waxa aan koobbi(nuqul) ama qoraal kooban kaa siineynaa macluumaadkaaga caafimaadka, oo sida caadiga ah 30 maalmood gudahood ayaad nooga heleysaa. Waxaan kaa qaadi karnaa qarash macquul ah, oo ku saleysan qiimaha. Waxaan diidi karnaa codsigaaga eegista iyo nuqul kala bixida xaaladaha qaarkood ee aadka u kooban. Haddii laguu diido inaad hesho xogta caafimaadka, waxaad codsan kartaa in diidmada dib u eegis lagu sameeyo. Xirfadle caafimaad oo kale oo ruqsad leh oo ay xulatay Corewell Health ayaa dib u eegis ku samayn doona codsigaaga iyo diidmada. Qofka fulinaaya dib u eegista

ayaan noqon doonin qofka diiday codsigaagii hore. Waxaan ku dhaqmi doonaa natiijada dib u eegista. Haddii aad ka qaybqaadanyso hawlaha cilmi baarista, waxaan diidi karnaa codsigaaga eegista iyo nuqulka qaar kamid ah xogtaada caafimaadka ee qusaysa cilmi baaristaas, marba haddii aad ogolaatay xadidaada helitaanka noocaan ah markii aad saxiixday foomka ogolaanshaha kahor inta aadan ka qaybqaadan. Waxaan sidoo kale diidi karnaa helitaanka inta sharcigu noo fasaxaayo.

**Xaqa aad u Leedahay Wax ka badelka**: Waxaad ka codsan kartaa HIM in aan saxno macluumaadkaaga caafimaadka ee khaldan ama aan dhammeystirneyn. Naso waydii tani sida loo sameyo. Waxaan codsigaaga oran karnaa "maya", laakiin waa in aan sababta kuugu sheegeyno si qoraal ah 60 maalmood gudahood. Waan diidi karnaa codsigaaga wax ka badelka haddii uusan ahayn mid qoraal ah aysana ku jirin sabab taageerayda codsiga. Sidoo kale waan diidi karnaa codsigaaga haddii aad naga codsato inaan wax ka badelno xogta:

- Aanaan anagu abuurin, ilaa in qofka ama haayada abuurtay xogta aysan hadda jirin si ay isbadelka u samayso.
- Aan qaybta ka ahayn xogta caafimaadka ee ay hayso wakaalada Corewell Health.
- Aan qayb ka ahayn xogta aad xaqa u leedahay inaad akhrido aadna nuqul ka hesho.
- Ay tahay mid sax ah oo dhamaystiran.

**Xaqa aad U leedahay Liiska Shaacinnada**: Waxaad naga soo codsan kartaa liiska (wax u kala qoran) wakhtiyada aan meelo la sii wadaagnay macluumaadkaaga caafimaadka ilaa iyo lix sano oo ka horreysa taariikhda codsigaaga, cida aanu la wadaagnay, iyo sababta mid kasta. Waydii HIM sida loo codsado arintaan. Waxaan kuu soo direynaa meelaha aan u gudbinnay arrimahaaga oo dhan marka laga reebo daaweynta, lacag-bixinta, iyo hawlaha kale ee daryeelka caafimaadka, iyo meel kale oo gaar ah (sida wax kasta oo aad adigu naga soo codsatay in aan kuu sameyno). Waxaad halkii sano naga heli kartaa qoraalka aad naga codsato oo isku hoos taxan oo ah bilaash, laakiin waxaan kugu soo dallacaynaa khidmad yar oo macquul ah, oo ah kharashka la galayo haddii aad mar labaad qoraalka naga soo codsato ilaa iyo 12 bilood gudahood. Waa inaad ku sheegtaa codsigaaga nooca aad ku doonayso liiska (tusaale, waraaq ahaan ama elektaroonig ahaan).

**Xaqa aad U leedahay Codsashada Xadidaadaha**: Waxaad naga codsan kartaa in aan la isticmaalin ama aan lala wadaagin xogta caafimaadka qaar ee ku saabsan daaweynta, lacag-bixinta, ama hawlaha kale. Haddii aad adigu si buuxda isaga bixineyso adeeg laguu qabtay ama wax kale oo la xiriira daryeelkaaga caafimaadka, waxaad naga codsan kartaa in aanan macluumaadkaas lala wadaagin ceymiskaaga. Waan "aqbali" doonaa ilaa inta sharcigu nagu amraayo maahee in aan macluumaadkaas meelo kale la wadaagno, haddii ay saamaynayso daryeelkaaga, ama haddii aanaan awoodin inaan fulino codsigaaga.

**Xaqa aad U leedahay inaad Codsato Xiriirada Sirta ah**: Waxaad codsan kartaa inaan kaagala hadalno arimaha quseeya xogta daryeelka caafimaadka qaab gaar ah ama goob gaar ah. Tusaale, waxaad naga codsan kartaa inaan keliya kula soo xiriirno marka aad joogto shaqada ama boostada. Waan aqbali doonaa dhammaan codsiyada macquulka ah. Codsiga ayaa la samayn karaa inta lagu jiro diiwaan gelinta, loona diri karaa wakiilkaaga bukaanka, ama Xafiiska Sirta. Waxaa laga yaabaa inaan ku waydiino inaad codsigaaga qoraal ku qorto.

**Xaqa aad U leedahay Nuqulka Waraaqda ah ee Ogeysiiskaan**: Waxaad codsan kartaa nuqulka ogeysiiskaan xili kasta. Xata ahaddii aad aqbasho inaad ogeysiiskaan ku hesho qaab elektaroonig ah, wali waxaad xaq u leedahay nuqulka waraaqda ah. Waxaad ka helaysaa nuqulka ogeysiiskaan webseedkeena, **corewellhealth.org/policies**, ama wac midkood xarumaha Corewell Health.

### Isbadellada ku dhaca ogeysiiskan

Waxaan xaq u leenahay inaan badelno ogeysiiskaan. Waxaan sidoo kale xaq u leenahay inaan dhaqan gelino ogeysiiska wax laga badelay ee xogta caafimaadka ee aan horay u haynay ee kugu saabsan iyo xog kasta oo aan helno mustaqbalka. Waxaan soo dhigi doonaa nuqulka ogeysiiska hadda jira xarumaha, xafiisyada, iyo goobaha uu ogeysiiskaan quseeyo. Ogeysiiska waxaa ku jiri doona taariikhda dhaqangalka. Waxaa intaas dheer, nuqulka ogeysiiskii ugu danbeeyay ayaa lagu siin doonaa markasta oo aad iska diiwaan geliso xarun ama xafiis, ama lagu dhigo xarun si aad u hesho daawayn ama adeegyada daryeelka caafimaadka adoo ah bukaan jiif ama bukaan socod.

Haddii aad isleedahay xuquuqdaada sirta ayaa lagu xadgudbay, waxaad cabasho u gudbin kartaa Corewell Health ama xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha.
Si aad cabasho ugu gudbiso Corewell Health, iimeel u dir **privacy@corewellhealth.org** ama la xiriir:
Corewell Health, Chief Privacy Officer MC168,
100 Michigan Street NE, Grand Rapids, MI 49503.

Dhammaan cabashooyinka waa in lagu soo gudbiyaa qoraal ahaan.
Laguguma ganaaxi dono inaad cabasho gudbisay awgeed.

### Isticmaallada Kale ee Xogtaada Caafimaadka

Isticmaallada kale iyo shaacinnada xogta caafimaadka ee uu daboolaayo ogeysiiskaan ama sharciyada kale ee quseeya Corewell Health ayaa lagu samayn doonaa marka aad ogolaansho qoran samayso. Haddii aad noo ogolaato inaan adeegsano ama shaacino xogtaada caafimaadka, waad ka laaban kartaa ogolaanshahaaga qaab qoraal ah waqti walba aad doonto. Haddii aad ka laabato ogolaanshahaaga, ma adeegsan doono ama shaacin doono xogta caafimaadka ee kugu saabsan sababaha ku qoran ogolaanshahaaga qoran awgood. Ma awoodi doono inaan ka laabano shaacinno kasta oo aan horay ugu samaynay ogolaanshahaaga, waxaana nalaga doonayaa inaan hayno diiwaanadeena daryeelka aan ku siinay.



Corewell Health © 10.2023